

Xagaaga Badbaadada: Hawlo bilaash ah iyo meel badbaado leh oo loogu talagalay dhalinyarada

Jardiinooyinka iyo Madadaalada Seattle waxay bixin doonaan Summer of Safety (SOS), barnaamij bilaash ah oo bixiya hawlo habaysan iyo meel badbaado leh oo loogu talagalay dhalinyarada aan ku xidhnayn barnaamijyada kale ee la kormeero xagaaga. Barnaamijku waxa uu ku wajahan yahay u adeegida kooxo kala duwan oo dhalinyaro ah (da'da 10-18) ee ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

SOS waxay ka shaqayn doontaa 10 goobood oo xarumaha bulshada ah maalmo kala duwan inta lagu jiro xagaaga (eeg jadwalka hoose). Inta badan goobaha waxay bixin doonaan qado bilaash ah iyada oo loo marayo Barnaamijka Adeegga Cunnada xagaaga ee Magaalada. Hawlaha SOS ee joogtada ah waxa ka mid noqon doona safarada dibadda, farshaxanka iyo farsamada gacanta, iyo sidoo kale ciyaaraha iyo ciyaaraha fudud. Barnaamijku waxa uu shaqayn doonaa roob ama dhalaal oo looma baahna saxiix; dhalinyaradu waxay soo geli karaan maalin kasta iyo wakhti kasta inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee barnaamijka.

Su'aalo? Fadlan la xidhiidh xarunta bulshada wixii macluumaad dheeraad ah.

Jadwalka Badbaadada Xagaaga 2022:

Goobta	Taariikhda	Waqtiga	Kooxda Da'da La Bartilmaameedsanaayo
Bitter Lake Community Center	7/5-8/26	12 galabnimo ilaa 5 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	11-15
Delridge Community Center	7/5-8/26	12 galabnimo ilaa 5 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	11-15
Garfield Teen Life Center	7/5-8/25	1pm ilaa 6 pm. Isniin ilaa Khamiis	13-18
Magnuson Community Center	6/27-8/26	1pm ilaa 6 pm. Isniin ilaa Jimcaha	11-14
Lake City Community Center	7/11-9/1	Isniin/Arbaca: 11 subaxnimo ilaa 3 galabnimo; Talaado. 11 subaxnimo ilaa 4 galabnimo; Khamiis. 2 galabnimo ilaa 6 galabnimo (ma jiro Jimco)	12-19

Northgate Community Center	6/27-8/19	10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	11-14
Rainier Beach Community Center	7/5-8/26	Duhur ilaa 5 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	11-15
South Park Community Center	7/5-8/22	10 subaxnimo ilaa 3 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	11-14
Van Asselt Community Center	7/5-8/26	11 subaxnimo ilaa 4 galabnimo. Isniin ilaa Jimcaha	Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 10-18, laakiin jimcaha safarrada dibadda waxay noqon doonaan kuwa da'doodu tahay 10-16
Yesler Community Center	7/5-8/26	1pm ilaa 6 pm. Isniin ilaa Khamiis	11-14

